

Xeer sharci: 43 aasaasida faafinta


Rasmiga ah ee DGPL

31/3/99

FAAFINTA

RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sannka laad Garoowe 1 Sebtembar 1999 L.9

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland Soomaaliya

Qiimaha: waa Sh. So. 10.000 lambar walba. **Rukunka** Sannadkii waa Sh. So. 170.000 dalka gudihisa, dibeddana waa Sh. So. 500.000. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowdaa 1da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh. So. 3.000. Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la weydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda

TUSMADA
Qeybta Koowaad

SHARCI

- ✓ • Sharci Lam. 1 ee 31.03.1999..... "Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addahalaxiriirsan"..... Bogga 2
- ✓ • Sharci Lam. 2 ee 14/4/1999..... "Nidaamka Garsoorka"..... Bogga 10

Qeybta Labaad

XEER

- ☞ - Xeer - Hoosaadka Golaha Wakiilada Puntland..... Bogga 15
- ☞ - Xeer Madaxweyne Lam. 1 ee 16 Agoosto 1998 dhismaha Wasaaradaha Dowladda Puntland iyo magacaabidda Wasiirada dowladda..... Bogga 24

- Xeer Madaxweyne Lam.2 ee 12 Sebtember 1998 magacaabidda Agaasimayaasha Guud, Xubnaha Maxkamadda Sare iyo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowladda Puntland.....Bogga **26**
- Xeer Madaxweyne Lam.3 ee 13 Sebtember 1998 magacaabidda howlwadeeno Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Kaluumeysiga, Dekedaha iyo Kheyraadka Dabiiciga ah.....Bogga **29**
- Xeer madaxweyne Lam.4 ee 6 December 1998 magacaabidda Agaasimayaasha Waaxyaha Wasaaradaha iyo Maamulayaasha Gobollada iyo Degmooyinka..... Bogga **30**
- Xeerka Madaxweyne Ku-Xigeen lam.6 ee December 12.1998 Magacaabida Maamulayaal Degmooyin..... Bogga **35**
- Xeer sharci lam.11 ee 6 Marso1999 dhismaha Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DawladdaPuntland.....Bogga **36**
- Xeer Madaxweyne Lam 12 ee 7 Marso 1999 magacaabidda Garyaqaanka guud ee dawladdaBogga **38**
- Xeer_ Sharci lam 43 ee 1Agoosto1999 Aasaasidda faafinta Rasmiga ah ee Dowladda Puntland Soomaaliya..... .Bogga **39**

QAYBTA SADDEXAAD

Talooyin, Isgaarsiin, Ogeysiis iwm

Waxba ma leh;

**DAWLAD GOBO LEDKA
BUNTLAN EE SOOMAALIYA**



**PUNTLAND STATE
OF SOMALIA**

**XAFIISKA MADAXWEYNAHA
OFFICE OF THE PRESIDENT**

Tix :

Tariikh :

Ref. :

Xeer-Sharci Lr. 43 ee 1/8/1999 kuna saabsan Aasaasidda
" Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland"

Date :

MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,

MARKUU ARKAY: Axdiga Dawladda Puntland iyo Sharci Lam. 1 ee 31/3/1999 kuna saabsan
"Nidaamka Xukuumadda & Hay'adaha la Xiriirsan,

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Golaha Xukuumadda

ISAGOO TIXGELINAAYA: Baahida deg-degga ah ee loo qabo in la aasaaso Faafinta Rasmiga ah ee
Dawladda Goboleedka Puntland Soomaaliya oo lagu soo bandhigo, laguna baahiyo sharciyada iyo
xeerarka cusub, si lo xaqiijiyo jiritaankooda iyo habsami u dhaqan-gelintoodaba.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharciga soo socda:

Ood. 1aad Marka laga bilaabo 1da Agoosto 1999, waxaa la aasaasay Faafin Rasmi ah ee Dawlad
Goboleedka Puntland Soomaaliya oo hadda ka dib la oran-doono: FAAFINTA RASMIGA AH EE
DAWLADDA.

Ood. 2aad Laga bilaabo taariikhda qodobka 1aad ku cayiman dhamaan: Sharciyada, Xeerarka,
Awaamiirta, Heshiisyada lala galo Dawladaha shisheeye iyo hay'adaha caalamiga ah, qoraalada
rasmiga ah iwm ee si rasmi ah uga soo baxa Dawlad Goboleedka Puntland Soomaaliya waxaa lagu
baahinayaa, laguna soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Ood. 3aad Faafinta Rasmiga ah waxaa soo saaraya Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland--
Xafiiska Garyaqaanka Guud--qaybta Faafinta Rasmiga ah, bishiiba hal mar, haddiise loo baahdo bisha
gudaheeda, waxaa la soo saari karaa (suplement) cadadyaal kala duwan oo raacsan cadad bileedka
caadiga ah.

Ood. 4aad Maamulidda, kaydinta, qaybinta Faafinta Rasmiga ah, waxaa u xilsaaran Xafiiska
Garyaqaanka Guud-qaybta Faafinta Rasmiga ah. Faafin kasta, marka ay soo baxdo, qayb ka mid ah
waxaa la dhigayaa goobo cayiman oo dadweynaha u furan, si ciddii doontaa uga iibsato. Qiimaha
halkii nuqul wuxuu noqonayaa mid u dhigma qiimaha lagu soo saaro, waxana lagu go'inayaa Xeer-
Madaxweyne.

Ood. 5aad Xeer-sharcigaanu wuxuu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Madaxweynuhu, waxaana lagu
soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah, cadadka ugu horreeya ee soo bixi-doona, waxaana loo gudbin-
doonaa Golaha Wakiilada.

Garoowe, Agoosto 1, 1999.